

Cabista biyaha daadadka ka dib

Macluumaad ku saabsan goorta iyo sida dhib la'aan loogu cabi karo biyaha daadadka ka dib

Somali | Soomaali

OFFICIAL

Daadadka ka dib, shirkada biyahaaga bixisa ayaa kuu sheegi doonta haddii biyaha tuubadaadu ay amaan yihiin in la cabbo iyo in kale. Waxay soo saari karaan:

Talobixin ah lama cabi karo: Biyahaagu waxay leeyihiin kiimikooyin waxyeello leh iyo sun, cabbitaankuna aad baa loogu xanuunsan karaa.

Talo bixin ah biyaha karkari: Biyahaagu waxay yeelan karaan jeermis waana inaad karkarisaa biyaha ka hor intaanad isticmaalin. Cabitaanka biyaha aan la karkarin waxay kuu keeni karaan jirro.

Maxaa la sameeyaa haddii aadan cabbi karin biyaha tuubada

Ma cabbi kartid biyaha tuubada haddii wakaaladaada biyuhu ay soo saartay 'Talobixin ah ha cabbin'.

- Waa in:
 - ✓ aadan ka cabbin biyaha tubada barta ay dhibaataadu saameysey
 - ✓ aadan karkarin, daawo ahaan u isticmaalin biyaha koloriin ka leh ama aadan ku dhaqin warankiilo maadaama aysan taas micnaheedu ahayn waxay noqonayaan kuwo la isticmaali karo.
- Isticmaal biyaha caagaga iyo dhalooyinka (bottles water) kujiro si aad u cabto, ugu karsatid cunto, cabitaan ahaan, iyo caanaha ilmaha, samaynta baraf, cadayashada ilkaha ama biyaha ay xayawaanka rabaayada ah cabaan.
- Xaaladaha qaarkood, waxaad isticmaali kartaa biyaha tuubada si aad ugu nadiifiso musqulaha, gacmahaaga ugu dhaqdo, ugu qubeysatid (ha laqin) oo aad dharka ku dhaqdo. Jooji isticmaalka biyaha oo la xiriir dhakhtarkaaga haddii aad la kulanto wax cuncun maqaarka ah ama falcelin kale ah.
- Shirkada biyaha ku siisa ayaa ku ogeysiin doonta marka ay nabdoon tahay in la cabbo biyaha tuubadaada.

Waxa la samaynayo haddii loo baahdo inaad karkariso biyaha tuubada

Haddii shirkada biyaha ku siisa ay soo saartay 'talo ah in biyaha la karkariyo' waxaad u baahan tahay inaad karkariso biyaha tuubadaada.

- Si aad u kariso biyaha tuubadaada oo aad uga dhigto kuwo markaas la cabi karo:
 - ✓ biyaha gaarsii heer ay ku karkaraan ilaa aad ka aragto buufino badan oo dheriga ama jalmada salkeeda kasoo baxa taas oo muddo sii socota
 - ✓ qabooji biyaha ka hor inta aan la isticmaalin
 - ✓ jalmadaha korontada ku shaqeeya ee iskood isu damiya markay karkaraan ayaa ku habboon. Jalmadaha heerkulka kala duwan waa in loo qiyaasaa karkarinta
 - ✓ ku kaydi biyaha kulul weel nadiif ah oo xiran
 - ✓ qabooji biyaha ka hor inta aan la isticmaalin
 - ✓ waa in taxaddar la sameeyaa si looga fogaado dhaawacyada ka dhasha gubashada.
- Biyaha la karkariyey waa in loo isticmaalo cabbitaanka, diyaarinta cuntada, cabbitaannada, iyo caanaha carruurta; samaynta baraf; cadayashada ilkaha iyo biyaha ay cabaan xayawaanka rabaayada ah.
- Biyaha aan la karkarin waxaa loo isticmaali karaa in gacmaha lagu dhaqo, qubeys (hubi in aan la cabin), musqulaha lagu dhaqo, weelasha iyo dharka lagu dhaqo, beerta ama meel banaanka lagu waraabiyo.

- Shirkada biyaha ku siisa ayaa ku ogeysiin doonta marka ay nabdoon tahay in aad cabto biyaha tuubada adiga oo aan karkarin.

Hel caawimaad

- Kala xidhiidh shirkada biyaha bixisa wixii macluumaad ah <www.water.vic.gov.au/water-industry-and-customers/know-your-water-corporation>.
- Haddii aad ka walaacsan tahay inaad cabtay biyo wasakhaysan ama aad isku aragto astaamo u eg gastro, la xidhiidh dhakhtarkaaga.

Si aad ugu heshid daabacaadan qaab sahlan, iimayl u dir pph.communications@health.vic.gov.au